

BARO XUQUUQDAADA QAXOOTINIMO MARAYKANKA GUDIHIISA.

Warbixinta ku qoran warqadaan waxaa loogu talagalay in aay ku barto xuquuqdaada. Ma ahan in aan uqaadatid talo sharciyeeyaan. Ulajeedadeyna waxaa waaye in aan dad diyaarino oo aysan cabsanin. Haddii aad umaleyneesid in lacarqaladeeyay xuquuqdaada , waa in aad la hadashid qareen. Haddii aad adiga ama qoyskaaga ubaahantihiiin caawin deg deg ah, fadlan wac 911.

HOR UDHAC

Waxaan kunoolnahay marxalado adag. Ficoladi ka dhan ahaa qaxootiga iyo dib udejinta qaxootiga ee Mareykanka waxaay abuurtay cabsi iyo walaac. Sida aay xaqiijisay Maxkamad, qof walbo xuquuq ayuu leeyahay sida qaxootiga, dadka magangalyo doonka ah, dadka reer guuraaga ah, dadka haysta green cardka ama kaarka cagaaran, dadka deegaanka ah iyo dadka aan haysanin sharciga. Waxaan mudanahay in nala xushmeeyo si sharaf leh ayada oo aan la eegeynin Meesha aan kasoo jeedno iyo sida aan utukano. Dhamaanteen xuquuq ayaan leenahay. Qoraalkan waxaa loogu talagalay in in aay qaxootiga ka helaan warbixin muhiim ah ee ku aadan xuquuqdooda taaso jawaab u ah marxaladaha adag ee soo wajahay bulshadeena. Qoraalkan looguma talagalay in uu abuurto cabsi laga cabsanayo xubnaha sharciga ee dowlada. Waa muhiim in la fahmo ilaha gargaarka deg dega ah sida (Booliska, waaxda caafimaadka iyo dambamiska) kuwaas oo diyaar uah in aay caawiyaan qof walbo. Haka shakinin in aad wacdid 911 xili kasto ee kula soo gudboonaato arin deg deg ah.

Maxaa isbadalay?

Bishi Janaayo 27 deedi ee 2017, Madaxweyne Trump waxaa uu saxiixay amar madaxweyne kasoo joojinaayo dib udejinta qaxootiga ilaa afar bilood iyo joojinta qaxootiga dalka Suuriya ilaa iyo wakhti aan la cayimin. Waxaa kale oo ku qornaa amarka madaxweynaha mamnuucida dadka kasoo jeedo todobo wadan oo Muslin ah sida- Iran, Iraq, Libya, Somalia, Sudan, Suuriya iyo Yemen in aay soo galaan wadanka Mareykanka. Waxaa kale oo la yareeyay tiradi qaxootiga ee wadanka la keenayo oo laga dhigay 50,000 oo qof sanadkan taaso waliba lagusoo xulaayo diin. Hase ahaatee maxkamad ee dowlada fadaraalka ayaa dhahday qeeybo kamid ah amarka madaxweynaha waa sharci daro. Maxkamadi waxa aay joojisay si kumeelgaar ah amaradi ku qornaa amarka madaxweynaha. Qeeybaha aay diiday oo aay joojisay maxkamada ayaa ah 120 ki beri ee la joojiyay qaxootiga, joojinti soo galitaanki dadka kasoo jeedan 7di wadan oo aan soo sheegnay iyo joojinti soo galitaanki dadka kasoo jeedo Suuriya. Xaalada xili walbo ayey isbadali kartaa maxaa yeelay arinti waxaa la geeynaayaa maxkamada sare ee Mareykanka. Waxaa kale oo uu madaxweynaha saxiixay amar lagu xoojinaayo socdaalka oo dib loo celinayo dadka sharci la'aanta ah. Kuwaas oo daba socdo hadal haynti xiligi ololaha ee doorashada.

Maxaa igu dhici doono qaxooti ahaan amarka madaxweynaha kadib.

Haddii hada aad tahay qaxooti jooga dalka Mareykanka, amarka madaxweynaha kuguma yeelanayo wax saameyn ah. Weli waxaa aad leedahay xuquuqdaadi sharciyeesnayd. Waxaa codsan kartaa kaarka cagaaran ama green kaarka hal sano kadib. Sdoo kale waxaa aad codsan kartaa baasaboorka 5 sano kadib. Laakin aad kasoo jeedid 7di wadan oo lagu mamnuucay amarka madaxweynaha, fikrad fiican ma ahan in aad safartid wakhtigan oo aad usafartid dalka Mareykanka banaankiisa. Waa in aad tashatid qareen socdaal si aad uheshid warbixin dheeraad ah. [therefugeecenter.org/how-will-president-trumps-executive-order-affect-refugees/](https://www.refugeecenter.org/how-will-president-trumps-executive-order-affect-refugees/).

Ma in aan walwala?

Amarka madaxweynaha waxaa uu kala hakiyay isu imaashihii qoysaaska ku kala nool dibadaha. Maadama uusan waxba udhimaynin qaxootiga horay ujoogay wadanka, waa muhiim in la dhoowro sharciga wadanka. Ma ahan in aan ka walwashid xuquuqdada qaxootinimo. Maadama aay qaxootiga ku xuquuqiyihin dadka deegaanka ah oo baasaboorka haysta marka aay joojiyaan booliska, suaalo, xarig ama rabaan in aay baaraan gurigaada, dambiyo yar yar ayaa sababi karo in lagaa qaado sharcigaaga. Haddii aad sugaysay in dib udejin lasiiyo reerkaaga waxaa aay qaadaneysaa mudo dheer laakin weli waxaa aay heestaan fursadi aay kucodsan lahaayeen dib udejin.

XUQUUQDA GURIGAAGA

Ka waran haddii aay imadaan wakiilo fadaraal ah gurigeysa si aay iila hadlaan?

Waxaa jira warar sheegayo in wakiilo FBI ah ama waaxda amniga dalka in aay booqanayaan guryaha qaxootiga si aan ula hadlaan. Halkan waxaa ku xusan wixi aad samayn lahayd hadii uu qof isku dayo in uu gurigaaga soo galo:

- **Hafurin albaabka:** FBI masoo gali karto gurigaaga ayaga oo amar aan ka haysanin maxkamad. Haddii aay ku tusaan amar maxkamadeed, fiiri taariikhda ku qoran iyo saxiixa. Haddii uu saxiixay xaakim maxkamadeed taariikhdana tahay sax waa in aad uogolaatid in aay soo galaan guriga. Waxaan sameen karta oo aad xaq uleedahay in aad ka aamustid oo aadan la hadlin. Haddii aaysan kutusin amar maxkamadeed, adiga ayaa uogolaan kartid ama udiidi kartid in aay soo galaan gurigaaga.
- **Aamusnoow:** wax walbo oo aad ku hadashid waxaa loo isticmaalayaa cadeyn maxkamada dhaxdeeda. Mareykanka waxaad xaq uleedahay in aad aamustid waxaadna ku dhahdaa FBI da “waxaan tiigsanayaa qodobka 5naad ee sharciga mana hadlaayi”
- **Wac qareen:** waxaad ka heli kartaa qareen websaaydka ama waxaad wici kartaa qareenada caalamiga ah ee [ACLU](#) ee magaaladaada.
- **HA SAXIIXAN WAXBA:** ha saxiixin waxba adiga oo aan la tashanin qareen.
- **IS ADKEE:** raadso qareen aamin ah. Bulshadaadana kaasho si aay kuula andacoodaan ama kuula doodaan. Haddii lagu xiro waxaa qaadan kartaa racfaan hana rajo dhigin.
- Dadka aanan ahayn deegaan ama aanan haysanin baasaboorka sida dadka haaysto green kaarka iyo qaxootiga waxaa aay ku xuquuqiyihin dadka deegaanka ah.

XUQUUQDAADA KU AADAN SAFARKA

Ma usafri karaa wadanka Mareykanka banaankiisa aniga oo haysta green kaar?

Wakhti xaadirkan waa la cunaqabateeyay amarki madaxweynaha ee mamnuucida qaxootiga iyo mamnuucida socdaalka, hase ahaatee waxaa kula talineeynaa dadka kasoo jeedo 7di wadan ee la mamnuucay in aaysan safarin hadii aaysan ahayn arin deg deg ah maxaa yeelay arinta waa isbadali kartaa wakhti dhow. Waa arin halis ah in uu hada qof aanan baasaboorka haysanin uu usafro dalka Mareykanka banaankiisa.

- Haddii aad jiraan dadkaaga wadanka banaankiisa oo aay hada qorsheeynayaan in aay soo laabtaan, waa in aad la xiriirtid qareen kahor inta aaysan soo bixin. Waa in uu soo qaataa qofka soo safraayo sharciyadiisa oo dhan sida green kaarka, warqada socdaalka ama baasaboorka.

- Qaxootiga aanan haysanin green kaar ama baasaboora sinaba waa in aaysan usafrin wadanka banaankisa haddii xitaa aaysan kasoo jeedin 7di wadan ee lamamnuucay.
- Wakiilada dowlada ee joogaan eraboorada waxaa aay awood uleeyihiin in aay ku baaraan oo aay suaalo kula yeeshaan.
- Haddii lagu dhaho suaalo dheeraad ah ayaa lagu yeelanaayaa eraboorka gudihisa, waxaad xaq uleedahay in aad codsatid qareen. Qareeno farabadan ayaa arintaan darteed ujoogo eraboorada.
- Haddii lagu xiro ama la xiro qof aad taqaanid, waa in aad la xiriirtid airport@refugeerights.org, ama wax qareenada caalamiga ah ee **ACLU**. Kadibna nala wadaag wixi aad kala kulaantid adiga oo isticmaalayo foomkan.

XUQUUQDAADA KU AADAN IN AAD AMNI UGU NOOLATID BULSHADAADA.

Ka waran haddii aan noqdo qof kudhiban gurigiisa ama dariskiisa?

Xuquuqdaada qaxootinimo waxaa aay kusiineysaa xuquuqda aay leeyihiin dadka deegaanka ah ee baasaboorka leh. Booliska magaaladaada waxaa aay ujoogaan in aay adiga kuu adeegaan oo aay ku difaacan mar walbo oo aad ubaahantahay. Haddii aad tahay dhibane dambi, waa in aad si dhakhsi ah uwacdid booliska: 911.

- Haddii aad dareentid in aad dhib kujirtid ama uu qof kuu hanjabaayo haka hor imaanin. [Waa in aad si dhakhsi ah aad uwacdid booliska adiga oo wacayo 911.](#)
- Haddii aad ucabsatid amnigaaga waa in aad la hadashid hay'adaa dib udejinta qaxootiga ama qareen.
- Haddii aad aaminsantahay in aad adiga ama qof aad taqaanid uu yahay dhibane dembi ama midib takoor kusaleeysan diin, dhalasho, kamid ahaasho koox waa in aad usheegtid <https://www.splcenter.org/reporthat>

Maku dhaqmi karaa diintayda cabis la'aan oo laii dhibaateeyo?

Waxaad leedahay xuquuq dastuuri ah oo ah in aad ku dhaqmi kartid diintaada. Waxaad xaq uleedahay in aad aadid meelaha wax lagu caabudo, in aad dhagaysatid muxaadaro ama aad ka qeeyb qaadatid arimo bulshadeed ama in aad kutukatid meelaha dadweeynaha.

- Haddii aad la kulantid midib takoor diineed ama lagu beegsado diintaada darteeda, waxaad la xiriiri kartaa **CAIR**.

XUSUUSO: sharciga ayaa kula jiro si uu kuu badbaadiyo.

DADKA SHARCIGA HAYSTO OO LAGU SOO OOGAY DAMBIGA.

- Dambiyada yar yar waxaa aay sababi karaan in dib loo caliyo dadka aanan haysanin baasaboorka.
- Haddii aadan ahayn deegaan haaysta baasaboora oo lagu xiro, usheeg qareenkaaga xaalada sharci. Haddii aad qiratid dambi waxaa aay burburin kartaa sharcigaaga sababina kartaa in dib lagu celiyo.

- Haddii rikoorka kuugu jirto dambi, waxaa muhiim ah in aad aragtid qareen aad kala hadashid wax yaalaha kuu banana ama kula gudboon.
- Waxaa laga yaabaa in aad heshid qaab aad iska masaxdid dambigaaga laakin gobal walbo sharci ugooni ah ayuu leeyahay ee la xiriir qareen.

XUQUUQDAADA HADDII UU KU SUAALO WAKIIL FBI AH

Wakiilada FBI waxaa laga yaabaa in aay kaa dalbadaan in aay kula hadlaan. Waxaad xuquuq uleedahay in aad diidid laakin waxaa laga yaabaa in aay kaa shakiyaan. Kala hadal qareen ama hayadaada dib udejinta qaxootiga hadaka ka hor. Haddii aad ogolaatid in aad la hadashid ama ku waraaystaan:

- Waxaad xaq uleedahay in uu kula joogo qareen xiliga wareeysiga. Ka raadso adeeg sharci halkan <https://cliniclegal.org/directory> or <http://www.aialawyer.org/>.
- Waad dooran kartaa wakhtiga iyo Meesha wareeysiga
- Waxaad codsan kartaa in aad ogaatid suaalaha wareeysiga iyo in uu kula joogo turjubaan.
- Ma ahan in aad ka jawaabtid suaalaha haddii aadan isku kalsooneen
- Haddii wali aad sugaysid qoyskaaga in dib udejin loo sameeyo wadanka Mareykan, waxaa laga yaabaa in aay qaadata mudo dheer, balse weli waxa aay haystaan fursadi aay codsan lahaayeen dib udejin.

XUSUUSNOW: waa in aadan sheegin warbixin been ah xiliga wareeysiga. Waxaa aay loo tixgalinayaa dambi taaso sababi karto marxalado lid ah.

LASOCO DUUBISTA VIDOOWGA EE ILAALADA SHARCIGA

DABIN

Dabinta waa marka uu qof boolis ah udhigo shirqool si uu danbi ugalo. Maadama laga yaabo in boolis dhar cad ah ama aanan labisnayn aay indha indheeyaan ficilada dadka Muslimka ah, waa muhim aad loo foajignaado oo aan lagu kicin falal sharci daro ah oo adaabta la ilaaliyo.

Duubista

Adiga ama qoyskaaga waxaa laga yaabaa in laidin duubo taaso loola jeedo in lagu ururiyo xog ama war. Duubista waxa aay ka koobantahay mid qarsoon, mid aan qarsooneen iyo si qarsoodi ah uu qof kuu daba qalo. Qofka waa la daba galayaa meel walbo oo ugalo. Waxaa kale oo la sameeyn karaa in guryaha loosoo qaroooco dadka si suaal loo weeydiiyo. Waxaa kale oo daba galaa qofka sida uu uisticmaali intarneedka, bogaga uu galo iyo waxyaalada uu dhagaysto. Waxaas oo dhan waa baaritaan sharci ah oo aay isticmaalaan wakiilada dowlada. Waa muhiim ah in aad la hadashid qareen hadii aad dareentid in laguugu daba jiro oo lagu baarayo.

La soco waxyaala kasocdo intarneedka

Ka taxadir in aad booqatid bogaga ka kooban waxyaalaha xagjirka ah hana kala hadlin hadalo xagjirnimo ah dad kale oo ah xagjiryaal. Kala hadal ilmahaaga sida muhiimka iyo saxda ah ee loo isticmaalo intarneedka iyo waxyaalaha aad rabtid in aay ka fogaadaan. Lasoco waxyaalaha aay ku sameeyaan onlineka kalana hadal in aaysan booqan bogaga dhibka keeni karo. Waxaad ka xirtaa meelaha aan munaasabka ahayn adiga oo isticmaalayo aalado xiri kara. Waxaa jira waxyaalo lasoo degsan karo

telefonkaaga kuwaas oo kaa caawin karo in aad la socotid waxa aay caruurtaada ku sameynayaan intarneedka sida [Teensafe](#)

QAABKA AAD UGU OLOEYN KARTID BULSHADAADA

Amarka madaxweynaha waxaa uu saameeyay qoysas badan oo qaxooti ah. Qaxooti ahaan waxaad tahay ololo muhiim ah ee bulshadada. Codkaaga waxaa uu leeyahay muhiim weyn. Qaxooti ahaan waxaad xaq uleedahay;

- In aad wacdid oo la kulantid dadka laga soo doorto gobalkaaga si aad xiriir ula sameysid, usheegtid waxqabadkaaga bulshada ama aad ka raadsatid in aay kaa caawiyaan dib udejinta qaxootiga ama waxyaalo kale oo adiga muhiim kuu ah.
- Dadka lawadaag sheekadada qaxootinimo si aad ubadashid aragtida shacabka ee ku aadan qaxootiga.
- Kubiir codadka kaladuwan sida shaqaalaha dib udejinta, hogaamiyaasha diimaha, ciidamada iyo hogaamiyaasha kale ee qaxootiga.

XUSUUSO: codkaaga waa muhiim

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Waxaa jiro hay'ado badan kuwaas oo bixiyo warbixino muhiim ah oo ku saabsan xuquuqdada iyo sidi aad qoyskaaga iyo bulshadada ugu dhigi lahayd amaan. Waxaa kale oo jira hadalo been ah oo kasoo baxayo baraha internetka kuwaasoo faaiideeysanayo qaxootiga. Fadlan hubso in aad raadsatid warbixin laisku hubo qaasatan marka aad ka raadsaneysid warbixin online. Qaar kamid ah warbixinada fiican oo muhiim ah waxaa ka mid ah:

The Refugee Center Online: https://therefugeecenter.org/resources/rights_laws/

The International Refugee Assistance Project: <https://refugeerights.org/>

Immigrant Defense Project: dontgeticed.org/

Informed Immigrant: www.informedimmigrant.com/resources/

American Civil Liberties Union: www.aclu.org/know-your-rights

Council on American-Islamic Relations: www.cair.com/know-your-rights.html

NILC: www.nilc.org/issues/immigration-enforcement/everyone-has-certain-basic-rights/

Customs & Border Protection: help.cbp.gov/app/answers/detail/a_id/66/kw/executive%20order

Refugee Resettlement Offices by State: <http://bit.ly/refugeeoffices>

Map of Immigration Legal Service Providers: <https://cliniclegal.org/directory>

For Schools: <http://neatoday.org/safeschools/>

For Non-Profit Organizations: <http://www.osce.org/odihr/39821?download=true>